



Wararkii U Dambeeyey EE Xanuunka PPS: Maarso 9

OGSOONOW: Inaad wixii fariimaha macluumaadka ka imanaya Dugsiyada Degmada, agabyada la isticmaalo iyo linkyada ay ku jiraan wixii su'aalo iyo walaac ahba laga heli karo halkani pps.net/coronavirus.

Gacaliye Qoysaska PPS,

Maalintii Axadii, Hay'ada Caafimaadka Oregon iyo Waaxda Waxbarashada Oregon waxa ay shaaciyeen tallooyinka jawaabaha laga bixinayo bukaanada iskuulada Oregon ee xanuunka COVID-19. Qeyb ka mid ah dhawaaqaas ay soo saareen waxaad ka akhriyi kartaa tallooyinka dhammeystiran marka aad [gujisaa halkani](#):

Waqtigan xaadirka ah, talladu waxay soo jeedineysaa in aan la xirin iskuulada iyo dhismayaasha aan laga helin wax qaba xanuunka COVID-19. Sidoo kale, waxay u soo jeediyeen iskuulada iyo Jaamacadaha in ay tixgaliyaan dhammaan inay sameeyaan badiil ka hor inta ayna xirin iskuul ama jaamacad haddii ay dhacdo in laga helo qof qaba xanuunka COVID-19 ardayda dhexdooda ama shaqaalahaba. Tallooyinkani waxay caddeynayaan muhiimada ay leedahay istaraajiyada ay maamulayaasha waxbarashadu ay isticmaali karaan sidii ay u yareyn lahaayeen khatarta xanuunka COVID-19 ee bulshada iskuulada dhexdooda iyo sidii loo ilaalin lahaa in ay ardayda ka lunto waqtigii ay waxbaran lahaayeen.

Tilmaamahani waxa ay aqoonsanayaan tallooyinka iskuulada iyo jaamacaduhu ay bixinayaan inay tahay mid muhiin u ah fayyo-qabka ardayda. Intaa waxaa dheer, iskuuladu waxay siiyaan arday fara badan sidii ay u heli lahaayeen daryeel caafimaad iyo cunto. In ka badan 22,000 arday ayaa waxa soo waajahday nooc hoy la'aan ah sanadkii tagey ee 2019.

Tallooyinka iskuuladu ay bixinayaan waxa weeyaan hubkii lagaga hortagaayey fidintaanka xanuunka COVID-19 iyo sidii ay ardayda iyo shaqaaluhu u heli lahayeen jawi waxbarasho oo caaddi ah. Marka la fiiriyo tallooyinka iminka jira ee ay bixisay hay'ada caafimaadka Oregon (OHA), waxa ay leedahay qofkii qaba cudurka COVID-19 ee ka mid ah ardayda iyo macalimiinta, waa in isagu si gaara ah meel isugu xiraa taasi oo ah sidii loo hortagayo in uu dadka kale qaadsiiyo.

Nabadgelyada, caafimaadka iyo fayyo-qabka ardaydeena iyo shaqaaluhu waa mudnaantayada koowaad. Waxa aan sii wadi doonaa wada shaqeyntii naga dhaxaysay Hay'ada Caafimaadka Oregon iyo Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah, iyo waliba iyada oo aan raacayno tallooyinkooda sidii aan u yareyn lahayn inuu fido xanuunkani iyo in ay carqaladi ku timaado iskuulada labadaba. Waxa kale oo aan sii wadi doonaa sidii aan xoog u saari lahayn muhiimada ay leedahay in gacmaha la dhaqo marka iskuulka la joogo. Shaqaalahayaga qaabilsan nadaafadu waxay hadda ku jiraan todobaadkii labaad ee mudnaanta ay siinayaan inay masaxaan oogada fasalada iyo meelaha ay ardaydu iskugu timaado. Iyada oo aan bilownay inaan u dirno iskuulada alaabooyin dheeraad ah oo ah sida kuwa wax lagu nadiifiyo ee jeermiska lagula dagaalamo iyo

iyadoo aan sii wadi doona in aan iskuulada gaadhsiino qalabyadii ay dhammaantoon u baahnaayeen todobaadkani.

Ugu dambeyntii, waxaan idiin xusuusineynaa sida ugu wanaagan ee aad nagu caawin karto in ay tahay dadaalka loo galayo in si joogta gacmaha loo dhaqo, marka la qufacayana ama la hindhisayo afka la daboolo, iyo in la isticmaalo qalabka lagu nadiifiyo gacmaha (sanitizer). Haddii ay jiraan qaar idinka mid ah oo isku arkaya calaamadaha hargabka ama ifilada waa in aad guryaha joogtaan, iyada oo aan iskuulada ama shaqada aan ku soo noqotaan marka aad aqoonsataan in calaamadihii aad isku aragteen ka bogsateen 24 saacadood gudahood. Haddii aad welwel ka qabto calaamadaha aad isku aragtay, fadlan waxaad la tashataa dhakhtar.

Waad mahadsan tihiin.